WORKERS' ACTION CENTRE

# XAD GUDUB IYO HANDADAAD EE GOOBTA-SHAQADA

GARO XAQUUQDAADA

TAXANAHA

War bixintan waxay khaas kaa ahaan khuseysaa, xad gudubka, midab-takoorka, iyo handadaada la dareemi karo wakhtiyada aad shaqaddada ku jirto. Waxa jira noocya kala duwan oo xad gudub ah, mid walbana wuxuu gaar ahaan u leeyahay tab iyo nidaam la isaga difaaco. War bixintan waxay kugu caawimeysa inaad garato tillabadi aad qaadi lahayd iyo qofka aad kala xiriiri lahayd haddi shaqada halkaasi aay dhibaato kugu haysato.

## DIFAACYO CUSUB EE SHARCI AH OO DHAQAN GALAY JUUN 2010

Is beddelka ku yimid sharciga Caafimaadka iyo amniga goobaha shaqada wuxuu tilmaamaya in xad gudubka iyo handadaada goobta shaqada, meel kasto oo ka mid ah goobaha shaqada Ontario. Isbeddelkani micnihiisu waa in nabad laga dhigo goobaha shaqada iyo in kuwa loo shaqeeyo aay mas'uul si buuxda ooga noqdaan ka difaacidda xad gudubka iyo handadaada loo geysan karo shaqaalahooda. Is beddelladani si toos ah uma khuseeyaan xad gudubka iyo handaada, laakinse waxay tahay oo keliya in la xaqiijiyo in kuwa loo shaqeeyo aay qaadayaan tillabadi ku habbooneyd si nabad looga dhigo goobta shaqada. Inay ogaadaan waxa aay ka sameyn lahaayeen haddi adiga xad gudub iyo handadaad aad kala kulanto goobta shaqada.

**Sharciga cusub wuxuu qoraya in cidda loo shaqeeyo laga doonayo inay hormariyaan**

- Siyaasadda ku aadan xad gudubka iyo handadaada, iyo sida barnaamijka ku aadan loo dhaqan gelin lahaa.
- Shaqaalaha sida loo gaarsiin lahaa siyaasadda iyo barnaamijyada loo qorsheeyey waxa aay xambaarsan yihiin.
- Cidda loo shaqeeyo sida aay war bixin buuxda ooga bixin lahayd shil ka dhaca goobta shaqada iyo cabasha ku saabsan xad gudub iyo handadaad.
- Habka baarista war bixinnnada ku saabsan shil ka dhacay goobta shaqada, dacwada la xiriira xad gudubka iyo handadaada laguugu sameeyo inta aad joogto goobta shaqada.

**Barnaamijka ka hor tagga handadaada goobta shaqada**

- Waa inay ka mid noqotaa sida looga hor tagi lahaa sida oogu dhaqsi badan handadaad ka dhacday ama ka dhici lahayd goobta shaqada gudaheeda. Tusaale, sida oogu dhaqsi badan oo taageero loo gaarsiin lahaa cid kasto ku sugan xaalad deg-deg u baahan.
- Cidda loo shaqeeyo waa inay ka feejignaataa culeeska aay leedahay qatarta ka imaan karta handadaad iyo xad gudubka goobta shaqa.
- Haddi cidda loo shaqeeyo aay ogtahay inuu jiro qof dabeecad qallafsan ama gacan fudud oo aad ku wada kulmi kartaan qeybo shaqada ka mid ah, waa in lagaaga digaa si aad isaga difaacdo jir-dil laguu geysan lahaa.

Haddii tuhun laga qabo ama laga war hayo inuu ka dhici karo goobta shaqada gudaheeda dagaal qoys, cidda loo shaqeeyo waxa waajib ku ah inay jawaab ka bixiyaan, isla markaasina si taxadar leh tillaba ooga qaadaan. Qofka shaqaalaha waa in laga difaacaa handadaad kasto xatta haddi aay ooga imaneyso meel ka baxsan goobta shaqada.

## Maxay ku kala duwanyihiin xad gudubka iyo handadaada goobta shaqada dhexdeeda

**Xad Gudubka Goobta Shaqada**

Micnaheeda waa qof awood jir dhis xoogan oo qof kale u geysto jir dil iyo dhaawac. Qofkaasi xatta haddi uu isku dayo oo keliya inuu jir dil ama dhaawac qof kale u geysto,waxa la oran kara in arrintaasi aay tahay Xad Gudub. Qof kasto shaqaale ah haddu ka sheegto amaba maleeyo in qatar iyo dhibaato jir dil ah ooga imaanayo qof kale oo dhaqan xuma la yimaaddo arrintasi waxa loo qaadan kara inay ka mid tahay Xad Gudub.

**Handadaad Goobta Shaqada**

Waa marka uu qof kugula kaco dhaqan xumo goobta shaqada dhexdeeda, isla markaasi isagoo weliba ogsoon inaan loo dulqaadan karin ficilkiisa xum. Ficilkan xun wuxuu noqon karaa: jees-jees, baaq, dibindaabyo, ama uu kuu soo diro wax gardarro muujinaya, oo ku baqdin geliya, haba ahaatee kaftan iyo cayaar wax uu oogu tala galay. Handadaada noocan ah inay tahay midabtakoor cad mooye, looma cuskan karo sharciga XUQUUQDA AADANAHA sida ku xusan qodobbadiisa.

# XUQUUQDA AADANAHA KU SAABSAN MIDABTAKOORKA IYO HANDADAADA GOOBTA SHAQADA

Qodobka Xuquuqda Aadanada wuxuu mamnuucaya midabtakoorka iyo handadaada ku saleysan jinsiyadda, midabka, faraca ama qabiilka, waddanka assal ahaan uu u dhashay, da'da, lab iyo dhiddig, Habka galmada, curyaan, guurka iyo xaaladda qoyska uu ka dhashay, waddaninimada iyo dembile hore loo cafiyey.

Qofka shaqaalaha rumeysan inuu shaqada kala kulmay handadaad ku saleysan Xuquuqda Aaadanaha wuxuu dacwad ka xareyn kara Maxkamadda Xuquuqda Aadanaha. Haddi dacwada aad ka xareyneyso ONTARIO HUMAN RIGHTS TRIBUNAL waxa kuu bannan inaad mudda hal san ah ku xareyso dacwada.

## IS BADBAADI

- Nabad Gal: Haddi aad dareento qatar inay ku soo food hayso, si dhaqsi leh u la xiriir Boliska. Waa hay'adda keliya oo awood u leh inay si deg-deg ah kuugu soo diraan koox wax ka qaban karta qatarta aad dareensan tahay inay kugu soo socoto goobta shaqada gudaheeda.
- Sida ku qoran nidaamka hawl gelinta ku saabsan caafimaadka iyo nabad gelyada, waxaad xaq u leedahay inaad diiddo shaqa kasta aad rumeysantahay inay xad gudub iyo qatar kugu tahay qabashadeeda.
- Kala hadal madaxdaada. Ayaka ayaa qaadaya tillabada ku habboon si aay kuu xaqiijiyaan nabad gelyadaada inta aad joogto goobta shaqada. Waa inaad meel ku qortaa tillabada aay qaadeen madaxdaada. Haddi aay madaxdaada wax qaban waayaan si loo joojiyo dhibaatada, war bixinta ku saabsan dacwadaada waxaad u gudbin kartaa Wasaaradda Shaqada (Ministry of Labour).
- Wasaaradda Shaqada qeybteeda Howlgelinta Caafimaadka iyo Badbaadada, waxay xaqiijineysaa in madaxdaada aay fuliyeen tilmaamaha uu qorayo qodobkaasi aan kor ku soo xusnay. Waxa jira tilmaama badan iyo xeerar badan ku qoran qodobbadan cusub oo lagu tusaaleynayo cidda loo shaqeeyo.
- Meel ku qor shil kasto oo ku saabsan midabtakoor, handadaad iyo xad gudub lagugula kaco. Arrintani waxay ku caawimi doontaa haddi aad go'aan ku gaarto inaad dacwooto. Haddi aad dareento in khasab lagaaga dhigo inaad dacwada ka noqoto, qoraalkaasi aad hore u qortay waxuu kugu caawimi doonaa inaad qaadato gunnada shaqa caymiska (EI) oo horay shaqada lagaaga goostay.
- Telefon u dir Worker Action Centre si aad oogala xaajooto habka isku soo dhawaashaha adiga iyo cidda aad u shaqeyso, si aad u xaqiijisato nabad gelyadaada. Telefonka aad direyso ha ahaado mid qarsoodi ah.

## TAAGEERO HEL

**Workers' Action Centre - Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha**
Wixi tafaasiil ah oo intaas dhaafsan oo ku saabsan xuquuqdaada shaqaale ahaan iyo taageero aad heshaa sida aad qorshe u sameysan lahayd wac 416-531-0778 ama tag www.workersactioncentre.org

**Toronto Workers' Health and Safety Legal Clinic - Xafiiska Sharciga Caafimaadka iyo Amniga Shaqaalaha ee Toronto**
Tafaasiil dheeraad ku saabsan caafimaadka iyo nabad gelyada wac 416-971-8832 ama tag www.workers-safety.ca

**Ministry of Labour, Occupational Health and Safety Branch - Wasaaradda Shaqada, Waaxda Caafimaadka Hawlgalka iyo Amniga**
Warar ku saabsan Caafimaadka iyo Nabad Gelyada inta shaqada lagu jiro iyo dhaqan gelinta sharcigan cusub oo kii hore beddelay wac Lacag La'aan: 1-877-202-0008 ama tag www.labour.gov.on.ca

**Assaulted Women's Helpline - Qadka-gargaaridda Haweenka lagu Xadgudbay**
Telefonka lagu gargaaro haweenka xaalad khatar ah ku sugan. Afaf kala duwan lagu hadlo wac 1-866-863-0511

**Human Rights Legal Support Centre - Xarunta Sharci Taageera Xaquuqda Aadanaha**
Waxa laga heli kara qareen ku takhasusay adeegyada ku saabsan. Xuquuqda Aadanaha. Haddi aad dareensantahay in laguugula kacay midabtakoor wac Lacag La'aan: 1-866-625-5179 ama tag www.hrlsc.on.ca


**416-531-0778 | info@workersactioncentre.org**

**www.workersactioncentre.org**



*Funded by*
*Financée par* Citizenship and Immigration Canada Citoyenneté et Immigration Canada Canada

Tixraac: Wasaaradda Shaqada ee Ontariyo. Macluumaadka warqaddan ku xusan waa kuwa guud ah.
Faahfaahin intaa ka badan la xiriir Wasaaradda Shaqada ee Ontariyo.

Harassment - Nov. 2011 - Somali